St. Cloud Area School District 742!

KU NOQOSHADA ISKUULKA

Wax ku Barashada Shakhsi ahaan & Sii wadista Qorshaha Adeegyada

2021-22

TUSMADA

Hordhac	3
Ikhtiyaarada Waxbarashada Ardayda	3
Qorsheyaasha Caafimaadka & Ammaanka	3-7
Maaskaro Xirashada	3
MSHSL/Hawlaha Ciyaaraha	4
Howlaha Heerka Dhexe	4
Kala fogaanshaha bulshada	4
Xiriirka & Raadinta Xiriirka	4
Karantiilka	5
Dugsiga xanaanada (Preschool)	5
Fasalada K-5	5
Fasalada 6-12	6
Nidaamyada Nadiifinta & Laydhinta	6
Dhaqashada Gacmaha & Habdhaqanka Haboon ee Neefsashada	6
Joogista Guriga Marka aad Xanuunsantahay	7
Tallaalada	7
Dadka soo booqanaya & Tabarucayaasha	7
Barashada Dareenka Bulshada/Caafimaadka Dhimirka & Fayodhowrka	7
Cuntada Iskuulka	8
Gaadiidka	8

HORDHAC

Markan aan galayno sanad dugsiyeedka 2021-22, Qorshaheena Ku noqoshada Iskuulka waxaa gundhig u ah guusha, fayoobaanta iyo ka howlgelinta ardayda. Kooxdeena u heellan ee barayaasha iyo shaqaalaha taageerada ayaa waxaa ka go'an inay siiyaan waxbarasho shaqsiyeed oo ku jirta jawi nabdoon oo caafimaad qabta qofkasta. Iyada oo la waafajinayo talooyinka CDC, MDH, MDE iyo saraakiisha caafimaadka ee maxalliga ah, iyo iyadoo ah tallaabo lagu yaraynayo karantiilida iyo in laga caawiyo in ardaydu ay sii joogaan iskuulka, qorshaha waxaa ka mid ah maaskaro xirasho guud oo carruurta iyo dadka qaangaadhka ah inta lagu jiro gudaha dhismayaasha degmada iyo inta la isticmaalayo gaadiidka degmada iyo sidoo kale adeegsiga joogtada ah ee xeeladaha yareynta khatarta ee lakabyada ah sida kala fogaanshaha bulshada marka ay suurtogaltahay, gacmo dhaqashada iyo anshaxa neefsashada, iyo habraacyada nadiifinta oo la xoojiyay. Waxaan sii wadi doonnaa kormeerka iyo hagaajinta hadba sida loogu baahdo sannad dugsiyeedka oo dhan.

XULASHADA WAXBARASHADA ARDAYDA

Ardayda dugsiga xanaanada (Preschool) - fasalka 12aad ayaa waxay ku soo laaban doonaan si ay wax ugu bartaan shaqsi ahaan shan maalmood toddobaadkii, iyadoo mudnaanta la siinayo la yeelashada xiriirka ardayda, samaynta bulshada fasalka oo wanaagsan, iyo taageeridda habdhaqanka horumarka joogtada ah.

Ma jiro ikhtiyaarka wax ku barashada masaafada oo hadda la bixinayo; si kastaba ha ahaatee, waxaa jira maalmaha wax ku waxbarashada dhijitaalka oo degmada oo dhan loo qorsheeyay sannad dugsiyeedka oo dhan. Macluumaadkaas waxaa laga heli karaa Websaydyada Degmada iyo Iskuulada.

QORSHEYAASHA CAAFIMAADKA & AMMAANKA

MAASKARO XIRASHADA

Dhammaan carruurta iyo dadka waaweyn, iyada oo aan loo eegin xaalada tallaalka, waxaa laga rabaa inay xirtaan maaskaro inta ay ku jiraan dhismayaasha degmada iyo inta ay isticmaalayaan gaadiidka degmada.

Degmo ahaan, guud ahaan waxaanu xiranaynaa maaskaro, sidaa darteed halista in la qaado COVID-19 aad baa loo yareeyey.

Maaskaro ayaa loo baahan yahay dhismayaasha gudahooda.

Waalidiinta/masuuladu waxay ka codsan karaan ka dhaafitaan dhakhtar caafimaad. Haddii la oggolaado, warqadda dhakhtarka oo ay ku qoran tahay sababaha ka dhaafitaanka ayaa loo gudbin doonaa maamulaha si dib loogu eego. Waalidka/mas'uulka ayaa markaa la ogeysiin doonaa xaaladda codsiga

Haddii ay dhacdo in arday uu diido inuu xirto maaskaro marka uu gudaha joogo, waa laga soo saari doonaa iskuulka waxaana maqnaanshaha loo tixgelin doonaa in uu yahay cudurdaar la'aan. Qofna looma ogolaan doono inuu soo galo dhismayaasha iskuuladeena bilaa maaskaro. Diidmada joogtada ah waxay keeni kartaa in iskuulka laga joojiyo.



Wixii macluumaad dheeri ah ee ku saabsan u hogaansanaan la'aanta, fadlan dib u eeg Xeerka Anshaxa: Dukumentiga Xuquuqda iyo Waajibaadka ee ku jira websaydka degmada qayba Qoysaska> Xeerka Anshaxa: Xuquuqda iyo Waajibaadka.

MSHSL/HAWLAHA CIYAARAHA

Degmada 742 waxay u baahan tahay in la daboolo wejiga marka lagu dhex jiro xarumaha degmada iyo marka la isticmaalayo gaadiidka degmada.

Hawlaha ay kafaala qaaday Minnesota State High School League (MSHSL), waxaanu uga baahan nahay maaskaro dhammaan ka qaybgalayaasha Degmada 742 marka aysan si firfircoon u tababaranaynin ama ugu tartamaynin ciyaarahooda ama howlohooda. Ka qaybgalayaasha iyo tababarayaasha ardayda ah ee degmada 742 waa in ay xirtaan maaskaro marka ay saaran yihiin gaadiidka degmada, ay kursiga keydka ku jiraan ama wadahadallada kooxda, marka ay ku jiraan qolalka labiska iyo hoolalka, ama meel kasta oo kale oo ka mid ah iskuuladeena. Waxaanu ka codsanaynaa dhammaan kooxaha soo booqanaya iyo daawadayaasha xafladaha MSHSL ee dhacdooyinka gudaha ah inay xirtaan maaskaro si waafaqsan qorsheyaasha degmada.



HOWLAHA HEERKA DHEXE

Ka qaybgalayaasha howlaha heerka dhexe, tababarayaasha, iyo daawadayaasha ayaa raaci doona isla qorshaha kor lagu tilmaamay.

KALA FOGAANSHAHA BULSHADA

CDC waxay ku talinaysaa ugu yaraan 3 fiid in ay u dhexayso ardayda mar kasta oo ay suurtogaltahay goobaha fasalka dhexdiisa ah. Intaa waxaa dheer, shaxaha fadhiga iyo isku duubida (u -ururinta ardayda koox koox) ayaa la sii wadi doonaa si looga hortago soo gaadhista.



XIRIIRKA & RAADINTA XIRIIRKA

Hadba sida ku habboon, qoysaska waxaa la ogaysiin doonaa kiisaska la helay ee ka jira xarumaha iskuulka iyo tallaabooyinka laga qaaday. Iyada oo ku xiran duruufaha, khatarta soo gaaraysa dadka kale ayaa waxay u dhaxayn kartaa mid hoose ilaa meel sareeya, oo qorsheyaashuna sida ku habboon ayay u kala duwanaan doonaan. Iskuduwaha Caafimaadka Dadweynaha ee Degmada 742 ayaa wuxuu u adeegi doonaa in uu yahay Iskuduwaha COVID-19 ee degmada wuxuuna la kaashan doonaa koox kasta oo kalkaaliye caafimaad ah ee ay leeyihiin iskuuladu si ay ula socdaan una soo sheegaan maalin kasta wixii looga shakiyo in uu yahay caabuqa COVID-19. Kooxda Jawaab Celinta ee Degmada District 742 COVID-19 ayaa kulmi doonta maalin kasta, ama hadba sidii loogu baahdo, si loo go'aamiyo tallaabada ku habboon iyo isgaarsiinta la xiriirta kiisaska la helo.

Dhamaan shaqaalaha iyo ardaydu waa inay iskood guriga isugu baaraan kahor intaysan soo galin dhismaha Degmada District 742. Haddii qof muujiyo astaamo, waa inuu guriga joogo oo raadsado daryeel caafimaad. Ardeyda muujisa astaamo iyaga oo jooga iskuulka waxaa loo galbinayaa Qolka Daryeelka si ay u sugaan gaadiid ama waxaa laga codsan doonaa inay isla markiiba ka baxaan dhismaha. Waxaa lagu talinayaa in dadka muujiya astaamaha la baaro.

Haddii ay dhacdo in qof qaba COVID-19 uu joogo dhisme ama howl Degmada 742 inta lagu jiro muddada faafitaanka, Iskuduwaha Caafimaadka Dadweynaha ayaa wuxuu la kaashan doonaa kooxda kalkaalisada iskuulka, shaqaalaha maamulka, shaqaalaha waxqabadyada, adeegyada gaadiidka, iyo shaqaalaha kaleba hadba sidii loogu baahdo si loo aqoonsado dhammaan xiriirada dhow ee kiiska la helay. Iskuduwaha Caafimaadka Dadweynaha iyo shaqaalaha kalkaalinta ayaa si wada jir ah uga shaqayn doona inay si degdeg ah ugu wargeliyaan qoysaska soo gaadhista COVID-19 iyo tallaabooyinka karantiilka ee habboon ee ay go'aamiyeen Kooxda Jawaabcelinta COVID-19 ee Degmada 742.

KARANTIILKA

Sababtoo ah xeerkeena guud ee maaskaro xirashda, Degmada 742 kuma amri doonto karantiilid ardayda lagu aqoonsado iskuulka inay xiriir dhow la yeesheen mar haddii ardaydaasi aysan lahayn wax astaamo ah. Ardayda laga helo COVID-19 waa la karantiili doonaa. Ardayda lagu arko calaamado iyo/ama xiriir dhow oo ka baxsan iskuulka waxaa laga yaabaa in la karantiilo.

In kasta oo ay jiraan tallaabooyinka yaraynta ee lakabyada ah oo la adeegsanayo, waxaanu ognahay in ardayda sannadkan la karantiili doono COVID-19 dartiis. Kooxda Degmada ee COVID-19 ayaa kormeeri doonta ardayda la karantiilay toddobaad kasta si ay u siiso hawlgalin heer sare ah oo loogu talagalay ardayda iyo taageero loogu talagalay macallimiinta inta lagu jiro wakhtiyada karantiilku badanyahay.

KARANTIILKA FASALADA XANAANADA

Qorshaha Waxbarista Maalinlaha ah

Macallimiinta dugsiga xannaanada ayaa waxay siin doonaan choice boards ardayda dugsiga xanaanada si ay ula dhammaystiraan dadkooda qaangaadhka ah, inta ay awoodaan, inta lagu jiro karantiilka. Choice boards kala duwan ayaa loo heli doonaa ardayda iyo dadkooda qaangaadhka. Macallimiintu waxay ardayga u soo diri doonaan nuqul warqad ah oo ah choice board kahor intaan la karantiilin marka ay suurtogaltahay. Macallimiintu waxay sidoo kale u diri doonaan choice board xiriirka qaangaadhka ah ee ilmaha iyada oo loo marayo Seesaw. Macallinku wuxuu la xiriiri doonaa qaangaarka ilmaha iyada oo loo marayo Seesaw si uu uga jawaabo wixii su'aalo

KARANTIILKA FASALADA K-5

Qorshaha Waxbarista Maalinlaha ah

Ardayda dugsiga hoose waxay geli doonaan Seesaw si ay wax u bartaan maalin walba. Intaa waxaa dheer, Choice Boards ayaa guriga lagu isticmaali karaa. Macallimiinta dugsiga hoose oo cayiman ayaa loo qoondeyn doonaa inay noqdaan shaqaalaha waxbarista masaafada. Ma jirto wax la filayo oo ah koorsooyin toos loogu wada xiriirayo ama isku dhaf ah inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka 2021-22. Shaqaalaha waxbarista masaafada ayaa waxay bixin doonaan waxbaris diirada la saarayo, waxbarid maalinle ah waxayna u qoondayn doonaan casharro maalin walba ah oo ku salaysan Wonders iyo My Math iyagoo la kaashanaya macallinka fasalka ardayga. Casharro dheeraad ah ayaa sidoo kale loo soo dhajin doonaa ardayda si ay uga qaybgalaan aagaga casharada kale. Shaqaalaha waxbarista masaafada ayaa sidaoo kale jadwal u samayn doona 90 daqiiqo maalin kasta si ay ugu diyaarsanaadaan baahiyaha ardayga ee shakhsiyeed. Macallimiinta fasalka ayaa dib u eegi doona ka qaybgalka iyo/ama soo dhammaystirka Howlaha Seesaw. Macallimiinta fasalka ayaa sidoo kale waxay maalin kasta la kulmi/la xiriiri doonaan ardaydooda iyaga oo adeegsanaya

Waxaan xaq u leenahay inaan codsano dukumintiga caafimaadka ee maqnaanshaha xad-dhaafka ah ee ardayga u baahan karantiil. Qorshaheena taageerada ee ardayda la karantiilay waxaa ku jira fursadaha iyo filashooyinka soo socda. Ardayda naafada ah ee ay tahay in la karantiilo waxaa loo meelayn doonaa si kiiska ku xiran oo uu dejiyey maareeyaha kiiskooda shakhsi ahaaneed.

ah iyo inuu ka bixiyo warcelin ku saabsan hawlaha lagu dhammaystiray choice board.

Taageerada Tacliinta & Ka qaybgalka Maalinta Iskuulka

Maamulka iskuulka ayaa wuxuu la kaashan doonaa macalimiinta dugsiga barbaarinta si ay taageero u siiyaan ardayda iyo qoysaskooda. Ardayda dugsiga barbaarinta ee la karantiilay ayaa waxay sidoo kale marin u heli doonaan xubnaha shaqaalaha oo ay ku jiraan khabiirada wacyigelin iyo khabiirada taageerada xiriirka oo laba luqadoodle ah si ay u siiyaan ka qaybgal tacliimeed oo joogto ah iyo taageero bulsho/shucuureed marka uu maamulaha iskuulku u arko inay lagama maarmaan tahay.

farriinta Seesaw, taleefanka ama Google Meets.

Taageerada Tacliinta & Ka qaybgalka Maalinta Iskuulka

Maamulka iskuulka ayaa wuxuu la kaashan doonaa macalimiinta masaafada iyo fasalka dhexdiisa si ay taageero u siiyaan ardayda iyo qoysaskooda. Ardayda dugsiga hoose ee la karantiilay ayaa waxay marin u heli doonaan xubnaha shaqaalaha oo ay ku jiraan khabiirada khayraadka habdhaqanka, la taliyeyaasha dugsiga hoose, khabiirada taageerada xiriirka oo laba luqadoodle ah si ay u siiyaan ka qaybgal tacliimeed oo joogto ah iyo taageero bulsho/shucuureed marka uu maamulaha(maamulayaasha) iskuulku u arko inay lagama maarmaan tahay. Kooxaha dugsiyada hoose ayaa la socon doona oo taageeri doona maamulaha (maamulayaasha) dhismaha u xilsaarida wax ka qabasho dheeraad ah oo loogu talagalay ardayda la karantiilo.

Ardayda leh Waxbarashada Shakhsi ahaaneed iyo Qorshayaasha 504 ayaa la siin doonaa isla taageerooyinka oo lagu daray Shaqaalaha Bulshada ee Iskuulka (School Social Worker) si uu ugu adeego in uu ahaado xiriiriyaha u dhexeeya maamulaha kiiska iyo qoyska hadba sida loogu baahdo.

KARANTIILKA FASALADA 6-12

Qorshaha Waxbarista Maalinlaha ah
Shaqaalaha dugsiga sare ee shatiga haysta ayaa la filayaa inay raacaan Waxyaabaha la Filayo ee Waxbarashada Degmada 742. Filashooyinkan waxay faahfaahinayaan adeegsiga Schoology oo ay ku jiraan soo dhajinta jadwalka, casharka iyo qaabka. U hoggaansanaanta filashooyinkan ayaa noqon doonta ta ugu muhimsan sababta oo ah ardayda la karantiilay ayaa waxay u geli doonaan Schoology si ay u wax u bartaan maalin walba. Ma jirto wax la filayo oo ah koorsooyin toos loogu wada xiriirayo ama isku dhaf ah inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka 2021-22. Si kastaba ha ahaatee, macallimiintu waxay dooran karaan inay taageero dheeri ah siiyaan ardayda la karantiilay iyagoo adeegsanaya e-mailo, farriimaha Schoology, wicitaanada ama Google Meets marka loo baahdo si ay u gutaan waajibaadkooda xirfadeed ee ka saaran ardayda.

Si kasta oo ay tahayba, marka ardaygu seego fasal, macallinka ayaa mas'uul ka ah inuu hubiyo in ardaygu heli karo waxbarashada iyo inuu muujiyo in uu bartay. Tan waxaa loo samayn karaa siyaabo kala duwan oo ay ka mid yihiin soo dhajinta qoraalada, bogagga khudbadaha, howl ku meelaynta kale, iwm.

Taageerada Tacliinta & Ka qaybgalka Maalinta Iskuulka
Ardayda dugsiga sare ee la karantiilay waxay heli doonaan taageero tacliimeed oo wakhtigaas socota oo kombiyuurka lagu xiriirayo iyo taageerada howlgelinta inta lagu jiro maalinta iskuulka iyada oo loo marayo Kaaliyaha Farsamada Taageerada Waxbarashada ama lataliyaha iskuulka ee jooga Kennedy iyo McKinley. Xubinkan shaqaalaha ahi wuxuu ku bixin doonaa taageero tacliimeed iyo farsamo khadka internetka ah Google Meet, farriimaha Schoology ama wicitaannada taleefanka. Taageeradan ayaa sidoo kale loo heli doonaa kaalmo qof ahaaneed oo loogu talagalay ardayda ka soo noqonaysa karantiilka.

NIDAAMYADA NADIIFINTA & LAYDHINTA

Habraacyada nadiifinta maalinlaha ah ee la xoojiyay ayaa sii socon doona sannadkan iyada oo si joogto ah loo nadiifinayo meelaha taabashadu ku badantahay. Nidaamyada HVAC ayaa waxay ku shaqayn doonaan "COVID mode" ("habka COVID") kaas oo kordhinaya soo qaadashada hawada bannaanka si loo siiyo laydhin la korodhiyay.

DHAQASHADA GACMAHA & HABDHAQANKA HABOON EE NEEFSASHADA

Ardayda iyo shaqaalaha waxaa la xusuusiyaa inay ku dhaqmaan dhaqashada gacmaha iyo habdhaqanka haboon ee neefsashada (daboolida qufaca iyo hindhisada) si looga hortago faafidda cudurrada faafa. Iskuuladu waxay la socon doonaan oo dhaqan gelin doonaan dabeecadahan waxayna bixin doonaan saabuunta gacmo dhaqashada iyo qalabka jeermis ka dilista.

Ardayda leh Waxbarashada Shakhsi ahaaneed iyo Qorshayaasha 504 ayaa la siin doonaa isla taageerooyinka oo lagu daray teknoolojiyada iyo takhasuslayaasha u fududaynta naafada si ay ugu adeegaan in ay ahaadaan xiriiriyayaasha u dhexeeya maamulaha kiiska iyo qoyska hadba sida loogu baahdo.

Taageerada Tacliinta & Ka qaybgalka Iskuulka Kadib
Ardayda dugsiga sare ee la karantiilay waxay heli doonaan taageero tacliimeed oo wakhtigaas socota oo kombiyuurka lagu xiriirayo marka la karantiilo, iyo mid qof ahaan ah marka ay soo noqdaan, maalinta iskuulka kadib iyada oo loo marayo lataliyaha taageerada tacliinta. Xubinkan shaqaalaha ayaa wuxuu u adeegi doonaa laba hawlood: inuu ka caawiyo ardayda inay helaan taageerooyinka tacliimeed ee iskuulka kadib oo ay ka mid yihiin Dreamline, u meerinta kale oo bulshada ku salaysan oo goobta jooga iyo tuutarada ardayda ah, iyo inay siiyaan kaalmo waxbarasho ardayda la karantiilo iyada oo loo marayo Google Meet, farriimaha Schoology ama wicitaannada taleefanka. Taageeradan ayaa la heli doonaa Talaadada, Arbacada iyo Khamiista laga bilaabo 4 ilaa 6 p.m.

JOOGISTA GURIGA MARKA LA XANUUNSADO

Joogista guriga marka aad la xanuunsan tahay astaamaha COVID-19 waa lagama maarmaan si cudurrada faafa looga ilaaliyo goobta iskuulka. Sanadkan, qoysaska waxaa laga codsanayaa inay dhammaystiraan foomka is-hubinta caafimaadka ee ardayga oo keliya haddii ilmahoodu astaamaha cudurka muujiyo, haddii laga helay cudurka, ama uu u faydmay qof cudurka laga helay. Kalkaaliyaha iskuulka iyo xoghaynta imaanshaha iskuulka ayaa markaa iska kaashanaya inay kula soo xiriiraan oo ay qoraan maqnaanshaha.

DADKA SOO BOOQANAYA & TABARUCAYAASHA

Heerarka isu gudbinta oo aad u sarreeya awgeed, wakhtigan dadka soo booqanaya looma ogolaan doono dhismayaasha marka laga reebo kuwa muhiimka u ah waxbarida ardayda iyo adeegyada taageerada ardayda ee tooska ah. Dhammaan mutadawiciinta iyo lahawlgalayaasha waxaa laga rabaa in ay tallaalanyihiin si ay u yimaadaan iskuuladeena.

TALLAALADA

CDC, MDH, MDE iyo saraakiisha caafimaadka maxalliga ah ayaa waxay si adag ugu talinayaan in dadka ka weyn 12 sano laga tallaalo COVID-19, laakiin ma aha mid waajib laga dhigayo. Si kor loogu qaado ka hortagga, Degmada 742 waxay iskaashi la samaynaysaa CentraCare Health System si ay u siiso tallaallada COVID-19 (Pfizer) lacag la'aan u ah ardayda 12 iyo ka weyn, iyo xubnaha qoyskooda, isla goobta Dugsiyada Sare ee Apollo, Tech iyo McKinley High Schools. Qaybta tallaalka ee ugu horraysa ayaa la bixiyay Agoosto 31 iyo Sept. 1. Tallaalada labaad ayaa la bixin doonaa Sebtember 29 iyo 30. Wixii su'aalo ah oo ku saabsan tallaalka, kala xiriir CentraCare lambarka: 320-200-3200.

BARASHADA DAREENKA BULSHADA/ CAAFIMAADKA DHIMIRKA & FAYODHOWRKA

Dhammaan ardayda laga soo bilaabo waxbarashada caruurnimada hore illaa fasalka 12 ayaa waxaa la waydiisan doonaa in ay ka qaybqaatan barashada shucuurta bulshada (social-emotional learning). Ardayda dugsiga hoose tan waxaa ugu jiri doonta casharro ku saabsan is-barashada nafsadeed, is-maamulka nafsadeed iyo go'aan qaadashada mas'uulliyada wadata. Ardayda dugsiga sare tan waxaa ugu jiri doonta barashada caafimaadka maskaxda iyo wacyigelinta ka hortaga isdilitaanka. Ardayda ku qaadanaysa adeegyo dheeraad ah iskuulka dhexdiisa oo ay ka helayaan shaqaalaha arrimaha bulshada iskuulka (social worker), lataliyaha caafimaadka daroogada, lataliyaha iskuulka ama shaqaalaha taageerada hab-dhaqanka ayaa sii wadaya xiriiradaas inta lagu jiro sanad dugsiyeedkan.

CUNTADA ISKUULKA

Sababta oo ah deeq ay bixisay Waaxda Beeraha ee Mareykanka, Ardayda Degmada 742 waxay haddana heli doonaan quraac iyo qado lacag la'aan ah sanad dugsiyeedkan. Qoysaska, si kastaba ha ahaatee, weli waxaa lagu dhiirigelinayaa inay buuxiyaan Arjiga Nacfiyada Waxbarashada.

Cuntooyinka dugsiga hoose waxaa lagu bixin doonaa kafateeriyada ama qolka qadada iyadoo ku xiran baahida kala fogeynta ee iskuul kasta. Cuntooyinka dugsiga sare waxaa lagu bixin doonaa kafateeriyada.

GAADIIDKA

Maaskaro ayaa laga rabaa in la xirto mar walba basaska. Basaska iskuulka ayaa lagu tirinayaa inay yihiin gaadiid dadweyne waxayna hoos imanayaan waajibaadka federaalka ee maaskaro xirashada marka lala socdo gaadiidka dadweynaha.

Kuraasta in la qoondeeyey ayaa lasii wadi doonaa basaska.